



SOLJA

SOMALILAND JOURNALISTS ASSOCIATION

Behind Ex-UNICEF Office, Shacab Area Tel: +25263-4194200/+2522572604

E-mail: soljajour@gmail.com / solja.ed@soljaorg.com Website: <http://www.soljaorg.com> Hargeisa, Somaliland

Ref: SOLJA/H/ -2020

Date: 05/01/2020

War-saxaafadeed: Walaaca xaaladda Caafimaad ee Wariye C/qaadir Coday

Ururka Suxufiyiinta Somaliland (SOLJA), waxa uu walaac wayn ka qabaa xaaladda Caafimaad ee wariye C/qaadir Sulaymaan Cismaan oo muddo laba bilood ku dhaw ku xidhan xarunta Danbi baadhista ee C.I.D-da Hargeysa.

Wariye C/qaadir Coday waxa maalmihii u danbeeyay isbedel wayni ku yimi xaaladdiisa Caafimaad gaar ahaan Dhiig-kar iyo Wadna xanuun daran, kuwaasoo sababay tiraba shan jeer inay ciidanka Booliisku geeyaan cisbitaaladda khuseeya xanuunkiisa si ay ula kulansiiyaan Dhakhaatiir wax ka qaban karta.

Ururka SOLJA, xadhiga wariye C/qaadir Sulaymaan Warsame (Coday) waxa uu u arkaa mid baalmarsan Heshiiskii ay Wasaaradda Warfaafinta iyo Hay'addaha warbaahintu wada gaadheen, sidoo kale; wuxuu ka soo horjeedaa Xeerka Saxaafadda Somaliland maadaama xadhigiisa ay Ciidanka Danbi baadhistu u mareen nidaam sharci darro ah.

Ururka SOLJA, waxa uu ugu baaqayaa xukuumadda iyo hay'addaha ay khusayso eek u xidhay Wariye C/qaadir Coday inay xorriyadiisa usoo celiyaan inta go'aan laga gaadhayo Dacwadda loo haysto ee ka socota Maxkamadda Gobolka Maroodi-jeex si uu u helo daryeel Caafimaad oo buuxa, maadaama wararka aanu ka helaynaa ay sheegayaan inuu ku jiro xaalad caafimaad darro oo aanu usii xidhnaa karin.

Dhinaca kale, Ururka SOLJA, waxa uu soo dhawaynayaa inay Maxkamadda Rafcaanka Gobolka Sanaag ay Damiin ku sii dayso wariye C/raxmaan Xidig inta kiiskiisa ay Maxkamaddu go'aan ka gaadhayso, maadaama marka hore xadhigiisa aan loo marin nidaam sharciga waafaqsan.

Ururka SOLJA, waxa uu sanadka cusub ee 2020-ka ugu baaqayaa Xukuumadda Somaliland inay isbedel la taaban karo ka samayso Dacwadaha ka dhanka ah Saxaafadda, iyadoo tixgalinaysa xeerka Saxaafadda ee hadda jira, isla markaana ay meel mariso Xeerka Saxaafadda Somaliland ee dibu habaynta lagu sameeyay, kaasoo muddo dheer wali horyaala wasaaradda warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyigalinta Somaliland.

Maxamuud Cabdi Jaamac

Guddoomiyaha Ururka Suxufiyiinta Somaliland (SOLJA)

